

# Ri, Eey iyo Sac

 Fabian Wakholi

 Marleen Visser


 Abdi Muse

 Somali


 Level 2

(imageless edition)







Ri, eey iyo sac baa waxay a  
haayeen saaxiibo isku wayn.  
Maalin maalmaha kamid ah waxay  
aadeen safar waxayna raaceen  
taksi.




Markay gaadheen dhammaadkii  
safarkooda, darawalka ayaa  
weyiyay in ey bixiyaan nooligooda.  
Sici waxuu bixiyay lacagtiisi.




Eeygi waxuu bixiyay xoogaa dheerad ah, sababtoo ah ma uusan haysan lacag sax ah.




Darawalka waxuu siin rabay eeyga  
baaqigiisa markay rida carartay  
ayadoon waxbo bixinin.




Darawalka aad buu u xanaaqay.  
Garrigii buu waday asagoo siinin  
eeygi baaqigiisi.



Taasina waa sababta xitaa maanta,  
eeyga uu ugu ordo gaadhiga si uu  
u qooraansado oo u helo  
darawalkii ka qabay baaqiga.



Rida waxa ay ka carartaa  
baabuurka xiinkiisa. Waxay kacabsi  
qabtaa in loo xidho bixin la aanta  
nooligi.



Saca na dan kamalahan markuu baabuur soo socdo. Sacaa waxuu qaataa waqtigiisa si uu jidka u gudbo sababtoo ah waxuu og yahay in uu bixiyay nooligiisi si dhameystiran.



# Storybooks Canada

[storybookscanada.ca](http://storybookscanada.ca)

## Ri, Eey iyo Sac

Written by: Fabian Wakholi

Illustrated by: Marleen Visser

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook ([africanstorybook.org](http://africanstorybook.org)) and is brought to you by [Storybooks Canada](http://Storybooks Canada) in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons  
[Attribution 3.0 International License](http://creativecommons.org/licenses/by/3.0/).